Tusmada Fududaynta

Qorshaynta Xaalada degdega ah ee Cimilada

Sidee ayaan ugu diyaarin karnaa Qoysaskeena Dhacdooyinka Cimilada aadka u Xun?

Tusmada hagista ah ayaa loo sameeyay inay xog siiso ayna u diyaariso qoysaska dhacdooyinka cimilada xun ee ka dhasha isbadelka cimilada ayadoo la samaynaayo dood iyo khibrad wadaag lala samaynaayo xubnaha bulshada. Isbadelka cimilada ayaa keenaaya noocyada badan ee caqabadaha maalin kasta ee muddada dheer iyo sidoo kale dhacdooyinka cimilada xun ee joogtada ah oo kasii daraaya; waxaan filaynaa in aqoon kororsigaan uu talaabo muhiim u noqdo qorshayntaada xaalada degdega ah ee cimilada ka qoys ahaan iyo bulshadaada guud. Haddii aad ku nooshahay Twin Cities, la xariir Natalya (narevalo@ceed.org) ama kasoo qaado Baakada Xaalada degdega ah ee Cimilada ee CEED oo aad ka helayso agabka aad u baahan marka ay jiraan xaaladaha degdega ah ee cimilada. Haddii aad meel fog jirto, waxyaabo badan ayaa laga heli karaa dukaanka agabka dhismaha ee deegaankaaga.

Agabka loo Baahan yahay

- Xaashi
- Qalin koobiyo
- Koolo bac

Khayraadka CEED ee lasoo degsan karo lana daabici karo

- Calaamadaha Khataraha Cimilada aadka U daran iyo waxa ay Tahay inaad Samayso
- Sida loo sameeyo qorshaha xaalada degdega ah ee Qoyska iyo Bulshada
- Dhis Kiishadaada Xaalada Degdega ah ee Guriga

Agabka ku jira Galka Xaalada Degdega ah ee Cimilada ee CEED

- Kiishada gurmadka caafimaadka
- Taraqyo
- Maaskarooyinka boorka
- Gacmo diiriyaal
- Koobo bac
- Gacmo nadiifiye
- Bustaha xaaladaha degdega ah
- Bacaha qashinka/baco balaastig ah
- Duub Tiishka musqusha ah
- Gacmo gashiyada adag ee shaqada/beerta
- Baakad baytari ah
- Raadiyaha cimilada ee gacanta lagu qaato ee AM/FM
- Kaydka dabka oo laanbad leh
- Toosh

Tallaabooyinka Fududaynta

A. Horudhac: Yaan nahay? Yaa halkan wada jooga (magaca/xaafada)? Yoolalka maanta [10 daqiiqo]

B. saamaynta uu deegaanka ku reebo isbadelka cimiladu [20 daqiiqo]

1. U sheeg ka qaybgaleyaasha inay soo qaataan kursi ayna sameeyaan mareegta koox balaaran. Adoo adeegsanaaya su'aalaha hagista, u sheeg ka qaybgaleyaasha inay ka fakaraan *waxa* isbadelka cimiladu ula muuqato, ayagoo tixraacaaya [xaaladaha degdega ah ee cimilada, ama saamaynta isbadelka cimiladu, ku yeeshay] bulshooyinkooda maxaliga ah:
    a. Maxaa kugusoo dhaca marka aad maqasho erayada “Isbadelka Cimilada”?
    b. Sidee kula tahay in isbadelka cimiladu u saamaynaayo aduunyada?
    c. Sidee kula tahay in isbadelka cimiladu u saameynayso gobalkaaga? Xaafadaada?
    d. Sidee isbadelka cimiladu u dhalisaa xaaladaha degdega ah ee cimilada?
    e. Xagee ayaad dagan tihiin? (tusaale magaallada waayn, tuulada, xaafada qoysku dagan yihiin)
    f. Xagee ayaad ka maqashaa sheekooyinka xaaladaha degdega ah ee cimilada?
        i. Maxay ka kooban yihiin sheekooyinkaan?
        ii. Tani ma ka dhici kartaa gobalkaaga? Xaafadaada?
        iii. Waa maxay noocyada xaalada degdega ah ee cimilada ee aad toos ula kulantay?
        iv. Bulshadaadu ma u diyaarsan tahay inay waajahdo xaalada degdega ah ee cimilada? (tusaale xarun wayn oo bulshadu iskugu timaado)
        v. Ma u diyaar garoowday inaad waajahdo xaalada degdega ah ee cimilada?

C. U diyaar garoowga xaalada degdega ah ee cimilada [25 daqiiqo]

1. Inta ay wali koox ahaan u shirsan yihiin, u dhiib agabka ku jira Baakada Xaalada degdega ah ee Cimilada ka qaybgale kasta. Ku wareeg mareegta una sheeg in ka qaybgale kasta la wadaago waxa uu haysto. Waydii haddii ay yaqaanaan waxa loogu talagalay/sida loogu adeegsan karo xaalada degdega ah ee cimilada, iyo inay tusmeeyaan haddii ay awoodaan. Haddii aysan hubin, usoo bandhig su'aasha kooxda oo dhan.
2. Adoo adeegsanaaya su'aalo tusmayn ah, ku boori ka qaybgalayaasha inay abuuraan qaybaha Baakadooda Xaalada Degdega ah ee Cimilada ayagoo adeegsanaaya agab ku haboon dhaqankooda. Si wadajir ah, u sameeya talo wadaag ay bulshadu hagayso:
    a. Ma jiraan agab ka maqan Baakada Xaalada degdega ah ee Cimilada oo aad ku darayso baakadaada [kaaga]? (tusaale hooyo ayaa halmar codsatay saliid qunbe, taasoo ah saliid ay u adeegsadaan karinta cuntada, daryeelka timaha, maqaarka, iyo waxyaabo kale)
        i. Xagee ayaan ka heli karnaa agabkaan?
        ii. Waa meeqa qiimahoodu?
    b. Intee qof ayuu ka kooban yahay qoyskaagu? (tusaale, carruurta,, xayawaanka rabaayada ah, waayeelka)
        i. Waa maxay agabka gaarka ah ee xubnaha qoyskaagu u baahan yihiin?
    c. Ma jiraan wax farsamooyin dhaqan ama hido ah oo aad aaminsan tahay oo muhiim u noqon kara marka xaalad degdeg ah oo cimiladu dhacdo?

D. Baahiyaha Bulshada [15 daqiiqo]

1. Ku adkee ka qaybgaleyaasha in ayagoo ah xubnaha bulshada, ay yihiin qaabab badan, shaqaalaha gurmadka degdega ah – ee qoysaskooda, dariskooda. Ku boori inay ka fakaraan sida ay uga falcelin lahaayeen haddii xaalad degdeg ah oo cimiladu dhacdo. Adeegso su'aalo hagis ah si ay u bilaabaan.
    a. Waa maxay doorarka xubin kasta oo qoysku ka ciyaaro marka xaalad degdeg ah oo cimilo dhacdo? Waa maxay sababtu? (tusaale ahaan, qoys ayaa mar sheegay in wiilkooda dhawr iyo toban jirka ah uu ahaa "orod-yahan", wuu ku orday dukaanka si uu u keeno agabka, wuxuu ku orday dariska si uu u hubiyo xaalkooda, iwm.)
    b. Xagee ayay tahay inaad aado marka xaalad degdeg ah oo cimiladu timaado?
        i. Maxay noqon kartaa meesha *ugu* haboon in la aado?
        ii. Ma heli kartaa meesha ugu fiican/ugu amaanka badan? Waa maxay sababta aad u heli karto ama u heli karin?
    c. Maxay xaafadaadu u baahan tahay si looga caawiyo qoyskaaga inay xal u helaan xaaladaha degdega ah ee cimilada marka ay sii bataan sabab la xariirta isbadelka cimilada?
        i. Yaa maamula baahiyahaan, isbadeladaan, doonisyadaan?

E. Muujinada iyo Gabo-gabada [10 daqiiqo]

1. Gebagebada; maxay barteen ka qaybgaleyaashu? Maxay la wadaagi doonaan xubnaha bulshada? Maxaan wali laga jawaabin?
2. La wadaag dedaallada qorshaynta magaallada ee la xariira u diyaar garoowga xaalada degdega ah ee cimilada, haddii ay jiraan.
3. Uga mahadnaq ka qaybgalayaasha waqtigooda iyo ka qaybgalkooda; waxaan filaynaa inay wax cusub barteen ayna hami u qabaan inay sii wadaan wada sheekaysiga lamid ah kan maanta.
4. U qaybi Baakada Xaalada degdega ah ee Cimilada iyo kaararka sawirada ah ee U diyaar garoowga xaalada degdega ah ee Cimilada.